## RAADI BUUGAAG BADAN

Buuggaagta ku jira boorsada dhowr jeer baa la aqrin karaa. Buuggaag ka badan waxaad kasoo amaahan kartaa maktabada ama rugta interneetka www.aakb.dk. Weydii shaqaalaha maktabada ama macalinka ilmahaaga si uu kaaga caawiyo fikrado buugaagta wanaagsan in loo waafajiyo danta iyo akhriska heerka ilmahaaga.

Waxaad ka heli kartaa fikrado buuggaag kale kaa siiya www.aakb.dk/tags/temalister-boern-unge. Waxaad kale aad ka amaahan kartaa buuggaaga elektrooniga / e-books iyo buuggaagta www.eReolen.dk iyo www.eReolenGo.dk. eReolen iyo eReolen Go labadaba waxaad u heli kartaa app ahaan oo aad buuggaagta ka aqrin/maqli kartid hadii aad haysato qadka interneetka ama hadii aanad haysan.

Ilmahaaga UNI log-in kiisa waxaad buuggaagta ka aqrin kartaa:
www.superbog.dk
www.læsløs.dk

Waxaad app ka ku qori kartaa sheekooyin gaagaban “Qor iyo aqri” ama rugta interneetka ee www.skrivoglæs.dk.

## READ MORE ABOUT READ

Waxaad wax aqriska ka eegi kartaa AQRI – wax wada aqrinta rugta interneetka ee www.aarhus.dk/read. Halkan waxaa kale aad ka heli kartaa, AQRI – Wax wada aqrin, iyo sidoo kale buuggaag yaryar iyo tilmaamo ay ku qoran yihiin af danishka iyo dhowr luqadood oo kale.

BØRN OG UNGE
Aarhus Kommune



# READ

## – WADA AQRISKA FASALKA 1AAD

# READ

## – WADA AQRISKA FASALKA 1AAD

## WAALID AHAAN MUHIIM BAAD TAHAY

Waalid ahaan door weyn baad ka cayaaraysaan horumarka iyo kartida wax aqrinta iyo wax qorida ilmahiina. Wax aqrinta iyo qorista waxay muhiim u tahay ilmahaaga kaalinta uu iskuulka ka geli doono iyo nolosha mustaqbalka.

Ilmahaaga wax aqrinta waxuu ka baranayaa iskuulka. Waalid ahaan waxaad taageeraysaa horumarka kartida wax aqrinta ilmahaaga hadii aad maalin kasto wax la aqrisid. Adiga oo aanad eegayn wax aqrinta ilmahaagawaxaad ilmahaaga jeclaysiin kartaa inuu wax aqriyo ilmahaaga, uuna noqdo qof wax aqiska kusii fiicnaada.
Waxaa kale aad ilmahaaga ku taageeri kartaa adiga oo kor u sii aqriyo buugaagta uu isaga aqrin karin

## LA AQRI OO LA HADAL ILMAHAAGA.

Wax wada aqrinta iyo ka hadlida waxaad aqrinaysaan waxay caawinaysaa horumarka kartida Luqada iyo aqrinta ilmahaaga.

Kala hadalka ilmahaaga ee buugaagta KA HOR intaadan aqrin, MARKAAD aqrinayso iyo KA DIB markaad aqrisid waa fikrad wanaagsan. Tilmaamaha “Sida ilmahaaga wax loola aqriyo” waxaad ka heli kartaa fikrado gaar ah oo ku saabsan sida aad buugaagta ooga hadli kartid.

Waxaad kala hadli kartaa shaxanka, erayada, nuxurka ama wax kale oo markaa maskaxdaada kusoo dhaca marka aad wax aqrinaysid.

Ilmahaaga cilmigiisa hadba intuu ka badan yahay buu erayada uu yaqaan oo uu isticmaalo buu fursad u leeyahay inuu noqdo aqriye wanaagsan.

Ilmahaaga waxuu u baahan yahay inuu barto erayo badan si uu u fahmo nuxurka buugaagta iyo inuu yeesho karti uu isugu muujiyo naftiisa qoraal ahaan.

Markaad weydiiso su´aalo furan iyo su´aalo aad wax ku ogaanaysid ilmahaagu si firfircoon buu uga qayb qaadanayaa wada hadalka ku saabsan buuga. Tani waxay kor u qaadaysaa luqada iyo rabitaanka uu iyo ilmahaagu rabo inuu wax ka halo.

Haddii aad ku hadasho luqad kale oo aan ahayn Danish, waxaad isticmaali kartaa luqadaas marka aad ka hadleyso buugga. Ka hadal hadallo iyo erayo ee labada luqadood, tan deenishka iyo tan afka hooyo ee ilmahaaga. Waxaa kale

Aqrin kartaa buugaagta ku qoran afka hooyo.



## TAAGEER ILMAHAAGA OO MARKII UGU HORAYSA KALIGII WAX AQRINAAYO

Fasalka 1aad, muhiimad sii inuu ilmahaaga kor u aqriyo buugaagta heerka waxbarashadiisa la siman.

Warqada ay ku qoran tahay “Sida loo taageero wax aqrinta ilmahaaga kaligii” waxaad ka heli kartaa caawinaad kuu faahfaahinaysa sida aad ilmahaaga wax aqrinta ugu taageeri kartid.

## WAQTI IYO RABITAAN WAX AQRIS

Waa muhiim wax aqrintu inay noqoto mid raaxo leh. Waqtigaas muhiimad gaar ah sii oo yaan lagu rabshayn ama lagaa soo dhexgelin. Hadii aad ilmahaaga dhiiri gelisid oo aad xiisaysid wax aqrintiisa ama wax aqrinteeda, ilmahaagu waxuu aqrin doonaa wax badan.

Hadii si kastaba ha ahaatee hadii uu ilmahaaga rabin inuu wax aqriyo, waxaad sameyn kartaa:

- raadi buugaag cusub oo ku saabsan waxyaalaha uu ilmahaaga xiisaynaayo
- tixgeli hadii uu buugu aad u adag yahay – ilmahaagu waa inuu eryada badankooda kaligii aqrin karaa
- dhiiri geli ilmahaaga inuu isla buugaa kaligii dhowr jeer aqriyo
- kor oogu aqri buuga ilmahaaga ka hor intuu isaga ama iyada aqrin
- waqtiga wax aqrinta soo gaabi
- goobta iyo waqtiga wax aqrinta maalmeed ha noqdaan munaasib

Hadii aad ogaato inuu ilmahaaga wax aqrinta dhib ku tahay ama aanu rabin markasto inuu wax aqrin, isku day inaad codsi baaritaan ah u gudbisid iskuulka. Pædagogisk Psykologisk Rådgivning ee degmada Aarhus xitaa waxaad ka heli kartaa talo bixin qarsoodi ah ee la-taliyayaasha wax aqrinta, kala xiriir tel no:. 8940 3777



## WAX LA QOR ILMAHAAGA

Ilmahaaga wax aqrinta wuu ku fiicnaanayaa hadii iyada ama isaga ay wax qoraan, teeda kale ilmahaagu hadii ay wax qoraan way ku fiicnaanayaan wax aqrinta. Ka qayb geli ilmahaaga waxyaalo maalmeedka aad qoraysid. Tusaale ahaan waxaad qori kartaa SMS ama liiska qoraalka waxyaalaha aad suuqa kasoo iibinaysid. Buugga “Liiskayga…” ilmahaaga waxuu samayn karaa sawir gacmeed ama waxuu qori karaa sheeko. Waxaa ugu muhiimsan inuu ilmahaagu wax qoro. Waxba maahan hadii uu xuruufaha si qalad ah u qoro.